

## **Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn (GED)**

Waxbarashada Aasaasiga ee Dadka waaweyn ayaa ka jirta Gobolka guud ahaan lana heli karaa ayada oo lacag la'aan ah qofka weyn ee wax baranaya. Sanad kasta in ka badan 500 oo goobood ayaa bixiya adeegaas qiyaas ahaana waxbarta ilaa 75,000 oo arday waaweyn ah. Kalabar ardaydaas ayaa u gudba barnaamijyada Waxbarashada Afka Ingiriisiga (English Learner - EL).

Waxbarashadaas Dadka Waaweyn waxa ka mid ah in u qofku qaato Shahaado (Diploma), Waxbarasho guud (GED), Barashada Afka Ingiriisiga ayada oo ah luqad labaad (ESL/EL), barista farta/akhriska ee goyska, horumarinta xirfadaha aasaasiga, fahmida aqoonta goobaha shaqada, Aqoonta barashada jinsiyada/cilmiga bulsho ee Wadanka Maraykanka. Barnaamijyadaas waxbarasho waxaa laga bixiyaa dugsiyada dadweynaha, ururada samafalka, qaar ka mid ah koolajyada farsamada, ama goobaha dhaqan celinta ee heer Gobol ama degmo.

Gobolka Minnesota dhalinyaradu waa in ay dugsiyada dhigtaan ilaa 17 jirkooda. Si aad u hesho waxbarashada dadka waaweyn (ABE) in aad ahaatid 17 jir iyo wixii ka weyn, kana soo qayb gelin waxbarashada K-12 ee dugsiyada dadweynaha, ama dugsiyad gaarka ah, ama aan soo baran xirfadha waxbarasho ee akhriska, qorista, ku hadalka iyo aqoonta xisaabaha.

Ogaanshaha macluumaadka ku saabsan adeega Waxbarashada Dadka waaweyn waxaad ka heli karta [Minnesota Literacy Council](#) website.

### **Imtixaanka Guud ee GED-ga**

Gobolka Minnesota shakhsiyaadka an haysan shahaadada dugsiyada sare wuxuu qaadan kara shahaadada loo yaqaan GED Diploma ee Gobolka Minnesota marka uu gudbo imtixaankaas GED-ga. Afarta Imtixaan ee GED-ga lagu qaato waxay u dhigmaan aqoonta dugsiyada sare ee Minnesota lagana rabo qofka ka qali jebinaya.

Haddii aad tahay 19 jir imikana ku jirin dugsi sare waxaad xaq u leedahay in aad qaadato GED ee Minnesota. Haddii aad tahay 17 ama 18 jir imikana ku jirin dugsi sare, codso dhafitaanka da'da ka hor imtixaanka. Form-ka dhafitaanka da'da iyo macluumaadkiisa waxaad ka heli karta Waaxda Waxbarashada ee Gobolka Minnesota. Waxa kale ee la socda form-kaas, waa in aad keenta ID-gaaga, ama wax u dhigma ID-ga oo sawir leh Dawladuna bixisay.

### **Digniin ku saabsan marin habaabinta haysashada GED-ga**

Shahaadada GED-ga ee Gobolka Minnesota laguma qaadan karo Internet-ka ama laguma qaadan karo casharada boosta la iskugu diro. Imtixaanaadka Guud ee Horumarinta Waxbarasho ee ay horumariyeen GED Testing Service waxaad u baahantaha diyaar garow xoogan si loo muujiyo heerka sare ee waxbarashada dugsiyada sare ama aqoonta farsamo ee looga bahan yahay gudbinta imtixaanka. Imtixaanaadka waxaa laga maamula oo keli ah Goobaha la yiraa Pearson VUE Testing Centers. Shahaado kale oo GED ah ama shahaado dugsi sare ee u dhiganta GED-ga ee aysan bixin Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waxaa dhici karta in ay aqbali waayaan shaqooyinku, kulliyadaha iyo jamicaduhu ama Ciidamadu.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto adeegyada waxbarashada dadka waaweyn ama shahaadada Minnesota GED nagala soo xiriir lambarka 651-580-8200. Haddii aad tarjumad u baahan tahay fadlan u sheeg soo dhaweynta luqadaada asaasiga ah.